Institute for Research Analysis & Dialogue

# QALALAASAHA KU SOO CUSBOONAADAY DEGMADA DIINSOOR

*WARBIXIN KOOBAN IRD001*
*MAY 2024*



## Xogta Machadka IRAD

Machadka Cilmibaarista, Daaraasaadka iyo Doodaha ee (IRAD), waa machad fadhigiisu yahay magaalada Baydhawa, Gobolka Baay. Ujeeddada Machadka waa; (1) Kobcinta iyo horumarinta aqoon isweydaarsiga, (2) Ambaqaadista hawlo cilmi-baariseed oo joogto ah, (3) Ka qayb-qaadashada jaan-goynta doodaha Siyaasadeed iyo (4) Dardargelinta wadahadallo furan oo ku saabsan arrimaha muhiimka u ah bulshada.

Get in touch

www.irad.so
info@irad.so
@irad institute
@irad institute.so

# Arar

Qoraalkaan wuxuu dul istaagayaa colaadda ka soo cusboonaatay Degmada Diinsoor ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya, wuxuuna si bayaansan usoo gudbinayaa sababaha ka dambeeya xiisadaha sii xumaanaya ee u dhexeeya qabaa'ilka degmada. Qoraalkani ayaa si buuxda u lafa gurayaa dhaqdhaqaaqyada isku dhaca beelaha ood wadaagta ah wuxuuna qiimaynayaa waxtarka dadaallada dib-u-heshiisiineed ee looga golleeyahay yaraynta ama dabar-goynta rabshadaha ka dhashay loollanka salka ku haya hardanka awoodda, loollanka khayraadka, iyo kala sheegashada deegaannada.

Soddonkii sano ee la soo dhaafay, waxaa soo ifbaxayay dhaqan cabasho oo ka dhex aloosan bulshada Soomaaliyeed oo ay muranno iyo khilaafyo yar yari u xuubsiibtaan gacan ka hadal dhiig ku daato[1] . Caadiyan, oday dhaqameedyadu taariikh ahaan waxay door muhiim ah ka cayaari jireen dhexdhexaadinta colaadaha, balse saameyntooda ayaa hoos u dhacday sannadihii u dambeeyay sababo dhowr ah oo ay kamid yihiin kororka hubka ku jira gacanta dadwaynaha oo keentay in si fudud loo helo hubka, dhibna loogu gaysto, waxayna tani sii kordhisay isku dhacyada; Dib-u-heshiisiin soo daahday waa marka oday-dhaqameedyadu inta badan bilaabaan dedaallo dib-u-heshiisiineed oo keliya ka dib marka ay colaaduhu isu beddelaan gacan-ka-hadal iyo khasaare hantiyeed.

[1] Eeg Warbixinta uu daabacay Prof. Cabdullahi Cisman, September 2007, (https://www.accord.org.za/ajcr-issues/cultural-diversity-and-the-somali conflict/#:~:text=Despite%20their%20differences%2C%20the%20conflict,members%20of%20the%20armed%20forces).

Falanqeyntan ayaa lagu eegayaa waxyaabaha salka ku haya colaadaha kasoo cusboonaaday qeybo ka mid ah deegaanada maamulka Koonfur Galbeed balse waxaa diirada lagu saaraya degmada Diinsoor oo ah ubucda isku dhacyadii ugu danbeeyay. Natiijooyinka ka soo baxay, falanqayntani waxay u ololaynaysaa habab dhinacyo badan leh oo lagu xallinayo khilaafka. Waxa ay xoogga saaraysaa sida ay lagama maarmaanka u tahay in la qaato hababka xallinta mashaakilka oo bulshada ka yimid, dib-u-habaynta garsoorka si kor loogu qaado isla-xisaabtanka, iyo in la xoojiyo awoodda hay'adaha dawladda si ay si firfircoon uga hadlaan sababaha khilaafka. Falanqayntan waxay ku baaqaysaa in la abuuro wada-hadal loo dhan yahay, sii wadida dhismaha iyo soo celinta golayaasha deegaanka, dejinta qorshayaasha dib-u-heshiisiinta ee heer dowlad-goboleed, horumarinta istiraatijiyad qaybsiga kheyraadka oo loo siman yahay, dhisidda guddiyo nabadeed oo heer degmo ah, iyo xoojinta haykalka dowladnimo oo uu ku jiro nidaamka garsoorka. Waana marka loo arkay in nabad iyo xasilooni waarta loo heli karo colaadaha Diinsoor iyo deegaannada ka baxsan.

Falanqayntan waxay adeegsatay hab cilmi baaris qeexan oo lagu lafo-guryo xogta lasoo aruuriyay ayadoo la adeegsanayo xog-waraysiyo muhiim ah oo lala yeeshay saraakiisha dawladda, bulshada, iyo culimada gobolka; dib u eegis lagu sameeyo ilaha labaad oo ay ku jiraan warbixinada amniga, warbixinnada hay'daha cilmi baariseed, iyo kuwa nabadda iyo colaadaha.

## Xogta Rasmiga ah Dowladda Koonfur Galbeed

Maamulka Koonfur-galbeed ee Soomaaliya ayaa sannadkii 2014-kii[2] ka mid noqday shanta dowlad goboleed ee xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, kaddib markii la ansixiyay dastuurka KMG ah ee Federaalka sannadkii 2012, iyadoo caasimaddiisa rasmiga ah ay tahay Baraawe, balse waxa uu maamulku si kumeel gaar ah ugu shaqeeyaa magaalada Baydhawa. Dedaalka bilowga ah ee lagu yagleelayo dawladnimadda degaannadaas wuxuu soo bilowday sannadkii 27kii November 2002[3] , waxana uu noqday maamul goboleedkii labaad oo laga hirgaliyo Soomaaliya. Dhismihiisii ka dib, odayaasha beeshu waxay madaxweyne u doorteen Shariif Xasan Sheekh Aadan.

Bishii December 2019 waxaa madaxwaynihii labaad ee Dawlad Goboleedka Koofnur Galbeed loo doortay Cabdicasiis Xasan Laftagareen. Shacabka gobolka ayaa si weyn ugu hadla lahjada Maayga ee afka Soomaaliga oo luuqadda la-isku-fahmo guud ahaan degaannada, (lingua franca). Dadka dega deegaannada Koonfur Galbeed waxaa kamid ah beelaha Digil iyo Mirifle, oo ay weheliyaan Biyomaal (Dir), Cawlyahan (Ogaden/Daarood), bulshada Baantuuga loo yaqaan, iyo qabiillo ka tirsan beesha Hawiye. Intaa waxaa dheer, magaalo-xeebeedka ganacsiga ee Marka iyo Baraawe waxaa sidoo kale dega Reer Baraawe iyo Rer Banaadiri oo ku hadla afaf u gaar ah. Degaannada Koonfur Galbeed waa degaannada ugu dadka badan gayiga Soomaaliya guud ahaan[4].

[2]Fadlan eeg warbixinta macahadka cilmi baarista ee Heritage ee la daabacay sanadiii 2020
[3]Waxaa lagu cadeeyay arinkaan qoraalka Prof. Maxamed Xaaji Mukhtaar oo lagu daabacay Website Hiiraan Online. Fadlan eeg Warbixinta oo luuqadda English ku daabacan
[4]Fadlan eeg warbixinta macahadka cilmi baarista ee Heritage ee la daabacay sanadiii 2020

Dhaqaale ahaan, maamulka Koonfur Galbeed waxa uu ku tiirsan yahay beeraha, dhaqashada xoolaha, iyo kalluumeysiga. Gobolka Shabeellaha Hoose ee hodonka ku ah beeraha, ee uu maro webiga Shabeelle ayaa ah meesha ugu wax soo saarka badan. Gobolka Bakool iyo Gobolka Baay waxay hab-nololeedkooda ku tiirsanyahay beero-xoolodhaqatada oo ku xiran roobabka.

Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed waxaa horyaala caqabado dhowr ah, oo ay ku jiraan amni darro wajiyo badan leh oo ka imaanaysa kooxaha xagjirka ah, murannada ku salaysan wadaagga khayraadka, iyo dhaq-dhaqaaqa awoodeed, kuwaas oo sababi kara dagaallo gacan ka hadal ah. Deegaanku wuxuu kaloo wajahaa abaaro soo noqnoqda oo ay uga sii dartay isbeddelka cimilada oo keentay diiramaadka dunnida.

Koonfur Galbeed oo caan ku ah deegaan ay ku  kulmeen dhaqamo iyo bulshooyin kala duwan waxaa ka jirta baahi ay tahay in si dhaqso ah loo xalliyo colaadaha soo noq noqday loona abuuro jawi dib u heshiisiineed. Waxaa jiray in muddo ah lagu hawlanaa in nabad waarta laga taabba galiyo deegaanka, warbixintan ayaana daaha ka rogaysa waddooyinka muhiimka ah ee xalka iyo midnimada lagu xajin karo.

Culaysyada xagga aminiga ee haysta Dawlad Goboleedka Koonfur Galbeed oo ay horay usoo mareen colaado kala duwan  waxaa hadda kamid ah kuwa ugu daran una baahan xalka waara isku dhacyada qabaa’ilka, oo ay ugu wacan tahay deegaanka oo kulansaday bulshoyin kala duwan, sida murannada isku baddala gacan ka hadlka ee ay keenaan daaqsinta, waraabka iyo beeraha.

Xaaladda waxaa uga sii daray saamaynta xun ee uu reebay is baddalka cimilada, sida xaalufka deegaanka oo si baahsan u jira, iyo dhibaatooyinka kale ee deegaanka lagu hayo waxayna arimahan sabab u noqdeen inay saamayn taban ku yeeshaan hab nololeedkii bulshooyinka beeralayda iyo xoolalayda ahaa, waxaana dhacay in bulshooyin badan u wareegaan magaalooyinka isla markaana uu bilowday tartan loo galay ilihii dhaqaale ee horay gabaabsiga u ahaa.

Maqnaanshaha joogtada ah ee nidaam la isku halayn karo oo dhuleed ayaa weli qayb ka ah sababaha huriya colaadaha iyo caqabad weyn oo hortaagan dadaallada dib-u-heshiisiinta. Colaado salka ku haya deegaannada, gaar ahaan kuwa u dhaxeeya dadka deegaanka iyo kuwa cusub ayaa ku badan deegaannada Maamulka Koonfur Galbeed. Intaa waxaa dheer, kooxda xagjirka ah ee Al-Shabaab, oo ku badan inta badan aagagga aan magaalooyinka ahayn ee dowlad-goboleedka Koonfur-galbeed ayaa sii kordhinaysa colaadaha qabaa'ilka deegaanka ee ku saabsan dhulka iyo khayraadka iyagoo ka faa'iideysanaya xiisadahaas. Kooxdan ayaa sidoo kale lacago aad u badan ka sameeya ganacsatada maxalliga ah ee badeecadaha u qaada gobollada Koonfur Galbeed. Intaa waxaa dheer, tirada sii kordheysa ee dadka deggan gobolka oo maxkamadaha xag-jirka ah u raadsada caddaalad si ay u xalliyaan arrimaha madaniga iyo dembiyada[5] .

[5]Eeg warbixinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha,Dowladaha Hoose Iyo Dib-U-Heshiisiinta KGS diyaarisya bisha April, 2024

In kasta oo ay jiraan dadaallo dib-u-heshiisiin iyo nabad-dhiseed oo kala duwan oo ka jira gobolka, haddana waxaa maqan qaab-dhismeed dhammaystiran oo heer gobol ah oo lagu xallinayo khilaafaadka. Si taas wax looga qabto, falanqayntu waxay soo jeedinaysaa in la dejiyo Qorshaha Dib-u-heshiisiineed oo ah heer Dowlad Goboleed si wax looga qabto caqabadaha ku gadaaman dowladnimada iyo dadaallada dib-u-heshiisiinta ee maamulkaas. Qorshuhu waa inuu dejiyaa hab-raacyo lagu xoojinayo dadaallada dib-u-heshiisiinta gobollada, iyadoo la raadinayo in la sameeyo hab midaysan oo wax ku ool ah oo lagu xalliyo arrimahan soo jireenka ah.

## Nolosha dhaqan-dhaqaale iyo Khilaafyada Diinsoor

Degmada Diinsoor ayaa ah mid ku suntan dhul wanaagsan iyo cimilo ku habboon dhaqanka beeraha iyo dhaqashada xoolaha. Sidoo kale, dadka ku dhaqan degmada Diinsoor ayaa caan ku ah u ololeynta nabadda iyo u istaagidda danta guud ee degmadooda.

Beero tabcashada iyo dhaqashada xoolaha ayaa ah ilaha dhaqaale ee degmada, walow in si fiican looga guul gaaro arimahaasina uu saamayn ku yeeshay is baddalka cimilada xilli dad badan oo degmada u dhashay ay nolol wanaagsan u doonteen deegaanno kale. Dhinaca kale Diinsoor waxay marti galisay qoysas tiro beel ah oo kasoo hayaamay deegaannada ku xeeran.

Laga soo bilaabo bishii August 2023, degmada Diinsoor waxaa ka taagnaa khilaaf iyo gacan ka hadal dhiig ku daatay oo muddo soo jiitamayay oo u dhexeeya beelaha Dabarre iyo Gelidle. Rabshadihii ugu horeeyay ayaa ku bilowday aargoosi iyo aano qabiil, hayeeshee waxaa u guntaday xallinta colaaddaasi odayaasha dhaqanka oo dhigay gogol nabadeed oo ay kasoo qayb galeen masuuliyiinta Koonfur Galbeed oo socotay muddo laba bilood ah. Kulamadaasi dib u heshiisiineed ayaa miro dhalay  ayadoo lagu heshiiyay in colaadda la joojiyo lana bixiyo magta dadkii ku dhintay colaadahaas.

Bishii November 8dii 2023, waxaa dhacay kulan nabadeed oo baaxad leh oo kulmiyay odayaasha dhaqanka, bulshada iyo hoggaanka sare ee Koonfur Galbeed, waxana ujeedkiisu ahaa xoojinta midnimada, baajinta colaado danbe oo dib dhaca.

Qodobada xusidda mudan ee heshiiskan ka mid ahaa ayaa ahaa in la bixiyo magdhowga dhammaan dadkii ay colaaddu saamaysay. Qadarka magdhowgu wuxuu ahaa mid kala duwan oo lagu saleeyay nooca khasaaraha sida burburka hantida iyo dhaawaca waxana uu u dhexeeyay $400 ilaa $2,000. Kiisaska khasaaraha nafeed magtooda waaa la wafaajiyay Shareecada Islaamka ee Diya. Intaa waxaa dheer, heshiisku wuxuu dejiyay nidaam adag oo lagu hakinayo rabshadaha mustaqbalka: ***'qof kasta oo  dila/nafta ka qaada qof kale ama waxyeello kale u gaysta qof kale oo ka tirsan qabiilka ka soo horjeeda wuxuu la kulmi doonaa masiir la mid ah iyada oo aan laga laba-labaynayn'.*** Heshiiska waxaa kala saxiixday xubno muhiim ah oo ka kala socday labada beelood iyo sidoo kale odayaasha dhaqanka Koonfur Galbeed. Ballanqaadkooda midaysan ee nabadda iyo dib-u-heshiisiinta ayaa noqotay tallaabo dhiirri-gelin leh oo hore loo qaaday.

## Doorka Golaha Deegaanka ee Geeddi-socodka Xallinta Khilaafaadka

Degmada Diinsoor waxay kamid tahay lix degmo oo ka tirsan maamulka Koonfur Galbeed oo leh gole deegaan oo la soo doortay. Dhismaha Golaha Deegaanku wuxuu kaalin wax ku ool ah ka ciyaaray degenaanshaha, horumarinta kaabayaasha, iyo dib-u-heshiisiinta degmooyinka Koonfur-galbeed, sida uu xusay machadka daraasaadka siyaasadda ee Heritage bishii Maarso, 2023[6] , sababtoo ah geeddi-socodku wuxuu dhigayaa in odayaasha dhaqanka ay udub dhexaad u noqdaan wada-xaajoodyada siyaasadeed iyo kuwa bulshada iyo abuurista dimuquraadiyad hoos laga soo bilaabay. Si kastaba ha ahaatee, waxa waqtigii xil haynta ka dhamaaday guddoomiyihii lasoo doortay ee degmada, waxaana lasoo magacaabay guddoomiye kale. Dhismaha golaha deegaanka waxaa qayb ka ah qabaa'ilka degmada kuwaas oo mid walba uu helayo saami-qaybsi oo caddaalad ah, waxana golaha dhisan ee kala duwan ay kaalin ka cayaari karaan xallinta khilaafaadka.

In maamulku ku guul daraystay soo dhisidda gole deegaan oo cusub oo bedel ikan waqtiga ka dhamaaday, waxay caqabad ku noqotay in horay loo sii ambaqaado dadaalladii nabadda ee degmada. Marka uu meesha ka maqan yahay golaha deegaanku waxay uga sii dari kartaa colaaddihii jiray maadaama matalaaddii bulshadu ay meesha ka maqan tahay. Guddoomiyaha degmada ayaa qudhiisu kaalin mug leh ka cayaara sugidda amniga iyo xaqiijinta nabadda ee deegaankiisa.

Soo celinta maamulka degmada Diinsoor ayaa keeni doonta hoggaan iyo maamul ay baahi weyn u qabto degmadu. Xubnaha golaha deegaanka ee la doortaa waxay la shaqayn karaan hogaamiyayaasha deegaanka, xubnaha bulshada, iyo daneeyayaasha si ay wax uga qabtaan sababaha keenay khilaafka iyo sidii xal waara loogu heli lahaa. Waxay gacan ka geysan karaan dhexdhexaadinta khilaafaadka, ka hortagga rabshadaha, iyo horumarinta wadahadal iyo dib-u-heshiisiinta dhinacyada iska soo horjeeda.

Intaa waxaa dheer, Guddoomiyeyaasha Degmadu waxay la shaqeeyaan hay'adaha sharci fulinta si loo ilaaliyo nabadda iyo ammaanka bulshada dhexdeeda. Waxay isku dubaridaan dadaallada hub ka dhigista maleeshiyaadka, la dagaalanka fal-dembiyeedyada, iyo xaqiijinta ammaanka dadka deggan Diinsoor. Soo celinta awooda Gudoomiyaasha Degmooyinka, Dawlad Goboleedku waxay muujin kartaa sida ay uga go'an tahay soo celinta sharciga iyo kala dambaynta gobolka.

Gudoomiyaasha Degmooyinka ayaa shacabka Diinsoor u fududeyn kara inay gaaraan adeegyada lagama maarmaanka. Aqoonta deegaanka iyo isku xirka ay leeyihiin, waxay u qareemi karaan mashaariic horumarineed, gargaar bini'aadantinimo, iyo hagaajinta kaabayaasha dhaqaalaha oo wanaajin kara nolosha dadka deegaanka, waxna ka qaban kara cabashooyinka hoose ee hurinaya colaadda. Marka laga soo tago doorka ay ku leeyihiin maamulka iyo amniga, Guddoomiyeyaasha Degmooyinka waa buundada isku xirta dowladda iyo shacabka Degaanka.

[6]Eeg Warbixinta Machadka Daraasaadka Heritage, ***District Council formation through indirect election in the Southwest State of Somalia: A means to democratization' March 2023***

## Falanqaynta Isku Dhacyada

Dagaal beeleedyada u dhaxeeya beelaha Soomaaliyeed ayaa ah kuwo soo noq noqda, colaadaha ka jira degmada Diinsoorna ee u dhexeeya beelaha Dabarre iyo Gelidlena waa lamid. Colaaddan ayaa waxaa ka dhashay dilal aargoosi ah oo in muddo ah socday, taasoo keentay in ay soo noqnoqdaan gacan ka hadal aan wali xal rasmi ah laga gaarin.

Si loo xaliyo colaadda u dhaxaysa beelaha Dabare iyo Gelidle waa in lagu dadaalaa sidii wax looga qaban lahaa waxyaabaha keenay colaadda iyo sidii dib u heshiisiin iyo nabad kuwada noolaansho loo taabbo galin lahaa. Tani waxay u baahan doontaa hab dhinacyo badan ay ku lug leeyihiin oo wax looga qabanayo cabashooyinka salka ku haya labada beelood, siinaya dariiqooyin lagu xalliyo khilaafaadka si nabad ah, isla markaana lala xisaabtamo kuwa mas'uulka ka ah hurinta colaadaha. In lala macaamilo madaxda bulshada deegaanka, culimaa'udiinka, iyo odayaasha waxay kobcinaysaa wada-hadal iyo kalsooni dhexmarta labada beelood.

Madaxda bulshadu waxay gacan ka geysan karaan fududaynta wadahadalada nabada, dhexdhexaadinta khilaafaadka, iyo ka shaqaynta sidii xal waara loogu heli lahaa murannada beelaha. In labada beelood laga qayb geliyo geeddi-socodka nabadda waa lagama maarmaan si loo xaqiijiyo in heshiis kasta oo la gaaro uu noqdo mid waara oo dhinacyada oo dhan ay ixtiraamaan. Intaa waxaa dheer, waa in lagu dadaalaa sidii loo xoojin lahaa ku dhaqanka sharciga iyo in lala xisaabtamo kuwa mas'uulka ka ah falalka rabshadaha. Arintan ayaa fariin adag u diraysa in aan loo dulqaadan doonin isla xisaabtan la'aanta iyo in cid kasta oo dhibaato geysatana lagula xisaabtami doono wixii ay ku kacdo. Xaaladda Diinsoor ayaa si weyn noo xasuusinaysa muhiimadda ay leedahay xallinta khilaafaadka wax ku ool ah iyo baahida loo qabo in la helo caddaalad degdeg ah.

Waxaa muhiim ah in dhammaan dhinacyada ay khuseyso oo ay ku jiraan maamullada, ay iska kaashadaan wax ka qabashada waxyaabaha sababaha colaadda, lagana hortago inuu dhoco khasaare nafeed oo kale. Wada hadal dhab ah, isfahan iyo go'aan nabadeed oo keliya ayaa lagu gaari karaa dib u heshiisiin waarta oo ka hana qaadda Diinsoor.

Si xal waara loo helo waa in dadka deegaanku colaadaha ku baddalaan wada hadal iyo walaaltinimo si looga baaqdsado rabshadaha iyo is nacaybkii ay dhaliyeen isku dhacyadii ugu danbeeyey. Maqnaanshaha hababka rasmiga ah ee xalinta khilaafaadka iyo dib-u-heshiisiinta ayaa sahashay in colaaduhu si sahal ah u qarxaan, waxaana arimahaani sii huriya ku lug lahaanshaha kooxo rabsho-wadayaal ah sida Al Shabaab oo si weyn u sii huriyay colaadda u dhaxeysa beelaha Dabarre iyo Gelidle[7] .

[7]Waxaa lagu xusay warbixinta colaadda Diinsoor ka hadlaysay oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dowladaha Hoose iyo Dib-u-heshiisiinta KGS

Bidhaaminta dadka hormuudka u ah falanqaynta iyo xal u raadinta rabshadaha, waxaa kamid ah dhiiri galinta, fahanka, xiisaha iyo awoodsiinta dadka hormuudka ah. In la muujiyo dadka kaalinta ka cayaara xallinta mashaakilaadka iyo xiriirka ka dhexeeya, iyo wacyiga sareeya ee is baddallada isku dhacyada iyo horumarinta iyo muujinta istraatijiyad ay si wax ku ool ah ugu hawl galaan. Iyadoo la sawirayo xiriirka ka dhexeeya kooxaha kala duwan iyo xiriirka dhexdooda ah iyo khariidaynta khilaafku waxay fududeyn kartaa wadahadal iyo dadaallo dhexdhexaadin ah oo ujeedadoodu tahay in lagu xalliyo khilaafaadka si nabad ah.

Falanqaynta saamaynta colaaddu ku leedahay bulshooyinka waxaa ay saldhig u tahay in la sameeyo waxqabadyo la beegsanayo si wax looga qabto baahiyahan laguna taageero soo kabashada iyo adkeysiga dadka ay saamaysay. Waxa kale oo lagama maarmaan ah in la qiimeeyo waxtarka waxqabadyada lana hagaajiyo xeeladaha si loo helo nabad iyo xasillooni waarta.

## Xallinta Khilaafaadka iyadoo loo marayo Hindisayaal Maxalli ah

Diinsoor waa in dadaal ballaaran lagu bixiyaa sidii nabadda iyo dib u heshiisiinta loo horumarin lahaa. Xeeladaha muhiimka ah ee nabadaynta degmada Diinsoor waxaa ka mid ah in la sameeyo guddiyo nabadeed oo heer deegaan ah. Guddiyadani waxay ka koobnaan karaan wakiillo ka kala socda qabaa'il kala duwan iyo qaybaha bulshada waxayna ka shaqayn karaan dhexdhexaadinta, xallinta khilaafaadka iyo horumarinta wadahadalka iyo isfahamka qaybaha kala duwan ee degmada.

Istaraatiijiyad kale oo nabadeed oo muhiim ah oo ka jirta Degmada Diinsoor waxay noqon kartaa horumarinta hindisayaasha ay bulshadu hormuudka ka tahay ee dib-u-heshiisiinta iyo xallinta khilaafaadka. Waxaa ka mid ah qaban-qaabada golayaal nabadeed, aqoon-is-weydaarsiyo, iyo isu imaatinno loo samaynayo beelaha deeganaka iyo bulshada si ay uga doodaan cabashadooda, fikradahoodana ku wadaagaan, loogana shaqeeyo dib-u-heshiisiinta. Wax qabadyadani waxay gacan ka geysan karaan kobcinta kalsoonida, isfahamka qabaa'ilka degmada iyo xallinta khilaafaadka daba dheeraaday.



Marka laga soo tago hindisayaashan maxalliga ah, waxaa jiray dadaallo lagu doonayay in lala yeesho hay'adaha dibadda, sida hay'adaha caalamiga ah iyo dowladda federaalka, si ay u taageeraan dadaallada nabadeynta ee ka socda degmada Diinsoor. Taas waxaa ka mid ahaa in la siiyo tababaro iyo taageero ku aaddan guddiyada nabada deegaanka, iyo sidoo kale samaynta barnaamijyo kor loogu qaadayo horumarinta dhaqaalaha, shaqo abuurka, iyo fursadaha kale ee bulshada.

## Talo Soo jeedin

***Soo jeedinteenu waxay ka kooban tahay xal laba-waji leh,*** mid waxay diiradda saaraysaa talo siinta Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, Dowladda Dhexe iyo Bulshada Caalamka halka tan kalena ay xoogga saarayso xallinta khilaafaadka iyadoo loo marayo hindise gudaha ah.

Qodobada soo socda ayaa ah talooyinka xalinta khilaafaadka ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed, Dowladda Dhexe iyo Bulshada Caalamka:

1. In maamulku uu mudnaanta siiyo xal u helidda colaadaha sida ugu dhaqsaha badan si looga hortago khasaare kale oo nafeed iyo burbur hantiyeed.

2. In si wax ku ool ah oo deg deg ah dib loogu soo celiyoo golihii deegaanka ee degmada Diinsoor.

3. In la dajiyo qorshaha dib u heshiisiinta dowlad goboleedka Koonfur Galbeed oo looga gol leeyahay in lagu xaliyo caqabadaha hortaagan dowladnimada iyo dib u heshiisiinta. Qorshuhu waa inuu qeexaa tilmaamaha lagu xoojinayo dadaallada dib-u-heshiisiinta ee gobolka, iyadoo la raadinayo in la sameeyo hab midaysan oo waxtar leh oo lagu xalliyo arrimahan soo jireenka ah.

4. In la sameeyo shabakad dhexdhexaadin oo maxalli ah oo ka jirta dhammaan degmooyinka maamulka Koonfur Galbeed si ay u wajahaan qaybna uga noqdaan xalka dhibaatooyinka soo kordha.

5. In Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed ay si deg deg ah u qaaddo talaabooyin waaqici ah oo lagu ogaanayo waxyaabaha salka u ah isku dhacyada iyo khilaafaadka, waxna looga qabto cabashada beelaha ee maamulka.

6. In Maamulka Koonfur Galbeed uu fududeeyo dib u heshiisiin dhab ah oo dhameystiran oo ay ka qeyb qaadanayaan wakiillada labada beelood. Waana inay qayb ka yihiin waxgarad iyo odayaal dhaqameed laga qaybgeliyo wada xaajoodka iyo hannaanka xallinta.

7 Waxaa lagama maarmaan ah in dib u eegis dhammaystiran lagu sameeyo falanqaynta isku dhacyada dhammaan deegaannada Koonfur-galbeed ee si looga hor-tago loona yareeyo colaadaha soo noqnoqday.

***Dib u eegista Nidaamka Garsoorka:*** In dib u eegis dhab ah lagu sameeyo nidaamka Garsoorka ee Ciidanka Koonfur Galbeed, gaar ahaan kiisaska la xiriira colaadaha u dhaxeeya beelaha. Tani waxay xaqiijin doontaa in si cadaalad ah loola dhaqmo dhammaan dhinacyada ay khusayso. 8

9 ***Xoojinta Hoggaanka Deegaanka:*** Xoojinta hoggaanka deegaanka, oo ay ku jiraan oday dhaqameedyada, iyadoo la siinayo agabka iyo taageerada lagama maarmaanka ah si ay si hufan u xalliyaan khilaafaadka iyo horumarinta hindisaha nabad-dhisidda.

Dhiirri-gelinta wada-hadallada socda iyo in la sameeyo wada-hadallo u dhexeeya labada beelood. Tani waxay kobcin doontaa isfaham, is-aaminaad, iyo iskaashi, taasoo u gogol xaaraysa wada noolaansho nabadeed. 10

11 Dajinta istiraatijiyad wax ka qabashada arrimaha ay ka mid yihiin loolanka beelaha iyo isku awood sheegashada gardarada ku dhisan ee ku qotonta barakicin.

Hubinta in falalka gacan ka hadalka ah lagula xisaabtamo hannaan garsoor oo caddaalad ah. Tani waxay gacan ka geysan doontaa soo celinta kalsoonida nidaamka caddaaladda waxayna meesha ka saaraysaa rabshado kale. 12

13 In la dhiirigeliyo hawlaha iyo mashaariicda wadajirka ah ee ay ka qayb qaadanayaan xubnaha labada beelood. Tani waxay kobcin doontaa kalsooni, iskaashi, iyo dareen bulsho oo la wadaago.

Hirgelinta ka-qaybgalka iyo wacyi-gelinta, qaabaynta hababka nabadda iyo dib-u-heshiisiinta ee guuleysta, iyo dhiirigelinta nabad-ku-wada-noolaanshaha, iyo kuwo kale. 14

Dhaqangelinta tallooyinkaas, waxaa la rajeynayaa in colaadda daba dheeraatay ee labada beelood ku dhexmartay Degmada Diinsoor si horumar leh xal looga gaaro, taasoo horseedi karta nabad iyo xasillooni waarta oo bulshada dhexdeeda ah.

IRAD

Institute for Research
Analysis & Dialogue

www.irad.so
info@irad.so
@irad institute
@irad institute.so